RELIGION & PLACE

# Daahfur

Tobankaa farshaxan, ee loo bixiyay Jestkii Caqiidada, waxaa curiyay farshaxhanyaqaan ku bandhigaya khibradoodii ay ka heleen la shaqaynta dugsiayada iyo dhismayaashii diimaha ee lagu muujiyay Mashruuca.

Farshaxanyaqaanadu waxay ku turjumeen aragtidii ardada ee ku saabsanayd dhismayaashii ay soo booqdeen iyo shaqo-kulamadii ay sameeyeen farshaxandaa sadex-dhinaclayaasha ah ee loogu yeedhay Jestkii Caqiidada kuwaasoo lagu soo bandhigi doono iyagoo ka qayb ah carwada joogtada ah ee Daahfuridda Dhismyaasha (the Building Exploratory).

Guji suurada si aad u heshid faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan mid kastoo ka mid ah Jestkii Caqiidada (Faith Chest).

## Gurdwara Sikh Sangat

Harley Grove E3 2AT

Masuulka Dhismaha : Jagmohan Singh Digpal

Dugsi: Dugsiga Mulberryee hablaha

Anna Hart and Lizzie Buckmaster

## Tixraaca Taariikhiga ah

Waxaa la dhisay isagoo ah Congregational Harley Street Chapel badhtamihii 1854kii, dhismahan waxaa loo badalay Mile End and Bow Great Synagogue iyo Talmud Torah badhtamihii 1927kii, kadib 1977kii wuxuu noqday tambal Siikh, The Gurdwara Sikh Sanghat.

## Aragtida Farshaxanyaqaanada

Ann Hart iyo Lizzie Buckmaster waxay la shaqaynayeen Dugsiga Mulberry ee Gabdhaha, Fasalka 8. farshaxanku wuxuu aragti ka bixinayaa farshaxanka gudaha dhismaha iyo muujinta aragtida dhismaha , isagoo asaas uga dhigaya muqaalka ururada jamaacada ah ee Dugsiga Axada ee caruurta, minaarad dahab ah iyo erayo laga soo qaatay Japji.

## St Paul’s Church

St Stephen’s Rd E3 5JL

Masuulka Dhismaha: Rev. Philipa Boardman

Dugsi: Dugsiga Mulberryee hablaha

Anna Hart and Lizzie Buckmaster

RELIGION & PLACE

## Tixraac Taariikheed

St Paul's Church waxaa la dhamaystiray 1878. Waxaa laga fujiyay minaaradii dheerayd 1950kii, kiniisadana waxaa soo foodsaaray dumitaan 1990kii. Haba yaraatee badhtamihii 2003kii ayaa Mashruuca Community Ark uu nolol cusub galiyay dhismaha kuwaasoo kusoo kordhiyay dhismo daakhili ah iyo isticmaalyo kala duwan oo ay ka midyihiin Gym, iyo carwo farshaxanka lagu bandhigo, kiniisaduna waxay ku faantaa in loo yaqaano maanta "A New Heart for Bow".

## Aragtida Farshaxanyaqaanada

Ann Hart iyo Lizzi Bucmaster waxay la shaqaynayaan Dugsiga Mulberry ee hablaha Fasalka 8aad. Farshaxan Silhouettes ah (waa farshaxan madow oo gadaashiisa ka iftiimayaan ilays) ayaa lagu muujiyay dhismaha kaa soo lagu soo

bandhigayo dhuumo ah shafaaf oo muujinaya dacalada camuudyada dhismaha cusub iyo dhuumaha organka ee Victorianka ah. Kalamadaha ay ardaydu doorteen si ay u qeexaan dhismaha waxaa lagu xardhay dhuumaya dhexdooda.

## East London Mosque

82-92 Whitechaple Rd, London E1 1JE

Masuulka Dhismaha: Ehsan Hannan iyo Abida Peters

Dugsiga: Sir John Cass iyo Dugsiga sare ee Redcoat CofE.

Farshaxanyaqaan: Sarah Crane

Masaajidkani wuxuu leeyahay taariikh dheer. Waxaa hoos ku xusan waa hawlgal bilaabmay 1905tii, waxaa laga bilaabay guryo ku yaala Commercial Road 1941kii. Wuxuu u guuray meesha uu ku yaalo imika ee Whitechapel Road 1975kii, iyo sifihiisa ah dhismo masjiyeed 1985kii, kaa soo ah jaajuur jaalle ah oo lagu xardhay jaajuur cascas, hadoodil ah dahabi iyo minaarat, kaasoo qaadaya 2000 oo wax caabudaya.

## Aragtida Farshaxanyaqaanka.

Ardadu waxay booqatay Masaajidka Bariga London waxay ku beegantay salaadii Jimce, sidaa darted waxay ahayd inaan dhaqankayagu uu noqdo mid maamuusaya dadka tukanaya. Abaabulkii muuqaalkii jestka caqiidada waxay koobsatay Tiirarka Islaamka oo ah lakabyo korukacay oo aha dhisme caadi aha oo ka turjumaya maamuuskii loo baahnaa.

## Kiinsada St Pual

Bow Common, E3 4LA

Masuulka Dhismaha: Rev Ducan Ross

Dugsiga: Sir John Cass iyo Dugsiga sare ee Redcoad CofE

Farshanyaqaan: Sarah Crane

## Tixraaca Taarikheed

Kiiniisada waxaa la dhisay sanakiii 1958-60kii, waxaanay bedashay kiinsada hore oo meesha ka dhisnaanjirtay oo waxa yeelo ka soo gaadhay Dagaalkii Labaad ee Aduunka. Waxay ahayd qor-she cusub oo si casri loo dhigay, meelo ama banaano basiid(fudud oo aan xeel dheerayn) ah oo ku xidhaya xaadirka iyo maadigba(wixii tagay) cida ku cibaadaysanaysa kiniisada iyo xidhiidhka sheekhu la leeyahay dadka uu wacdiyayo. Qurxinta mosaic (waa suurado ama muuqaalo la ga sameeyay walaxo yaryar oo la midabeeyay sida quraarada oo kale) waxaa lagaga kordhiyay gad-aal. Waxaa la siiyay darjada II.

## Argrida Farshaxanyaqaanka

Muuqaalada dadka ayaa la isticmaalay waayo iyagaa ka muhiimsan dhismaha, waa iyaga kuwa 'sameeyay' dhismaha wax lagu caabudo ee jooga qiimihiisa ugu sareeya. Booqashada aan ras-miga ahayni waxay ardada lunsiinaysaa inay waayaan cid si xor ah ugu waranta, farshaxanka jestkii caqiidadana waxa loola kasay inuu muujiyo dareen xoriyad iyo fan ah, Ujeedo maldahan oo ah xadhig aan si habaysan u xidhnayn iyo kala duwanaan aan habaysnayn.

## Congregation of Joacob Synagogue – Kehillas Yacov

Commercial Rd. London E1 2PS

Maamulaha Dhismaha: David Russell iyo David Brandes

Dugsiga: Dugsiga Wiilasha ee Bow

Farshaxanyaqaan: Onya McCausland

## Tixraac Taariikheed

Kehillaska Ya'kov ( Congregation of Jacob) waxaa la aasaasay 1903kii. Synagoguegan waxaa la dhisay 1920/1 waxaa u ahaa hool wayn oo la hadoodilay(qolka lagu tukanayo) oo ka danbeeya dhismaha hore. Waxa uu ahaa mid si joogto ah loo isticmaalo, waxaanu ahaa tusaale muuqda ka yahay synagogueyadii yaryaraa ee mar laga aasaasay dhamaan qaybtan East End.

## Aragtida Farshaxanyaqaanka

Furitaanka Jestka Caqiidada waxaad arkaysaa qoraal ah Hebrew, The Mah Tovu (Siduu u Fiican-yahay) tefilla ama ducada soodhawaynta iyo mahadnaqa ee caadi ahaan la akhriyo marka la soo galayo Syngoguega. Buluugu waa midabka muuqaalka badan leh- waa midabka maradii/looxii Torah haysay iyo farshaxanka daakhiliga ah ee synagoguega. Muuijinta lagu muujiyay jestka caqiidada waa ilays iftiiminaya sawir ah ark(dhisme soo xoodan) , waxa kaa ka hooseeya Xidigtii Daa'ud.

RELIGION & PLACE

## Kiniisadii St Dustan iyo All Saints.

Stepney Green, London E1 0NB

Masluulka Dhismaha: Fr. Christopher Burke

Dugsiga: Dugsiga Bow ee Wiilasha

Farshaxanyaqaanka: Onya McCausland

## Tixraaca Taarikheed

Tani waa kiniisada ugu muhiimsan ee ugu da'da wayn  Bariga London. Kiniisadan waxaa aasaasay St Dunstan sandkii 952kii CD. Kiniisada balaadhan ayaa la dhisay qarnigii 13aad waxaana dib loo habeyay qarnigii 15aad oo ah sida ay kiinisadu manta tahay. Qabuuraha waxaa loo isticmaali jiray in lagu aaso maydkii Great Plague (xanuunkii waynaa ee dadka madhiyay). Waxaa la siiyay darajada I.

## Aragtida Farshaxanyaqaanka

St Dunstan waxaa mar loo yaqaanay kiniisadii  Bada Kacsan (High Seas) badmareeno badana ayaa lagu aasay kiniisada xayndaankeeda; kalmadaha ku qoran jestka caqiidada waxaa laga soo qaatay mid ka midah kalmadaha xasuustaleh ee kiniisada. Waxay ku dhex sabaynaysaa baaxad dahabi oo laga soo dhex sawiray kiniisada dhexdeeda xariijin basiid ah oo muujinaysa xabaalaha, soo ifbaxa iyo basiidsanaanta farshaxanka medieval (casrigii dhexe).

## Build on The Rock International Ministries

13 -19 Herald St., London, 2 6JT

Masuulka Dhismaha: S ybil Joseph iyo Bashir Williams

Dugsiga: Dugsiga hablaha ee Bishop Charlloners Catholic Collegiate

Farshaxanyaqaanka: Viyki Turnbull

## Tixraaca Taariikheed

Build on the Rock International Ministries waxaa la aasaasay sanadkii 1978kii. Waxay qaadatay masaaxada dhowr dhismood imika waxay ku fadhidaa dhismihii warshadii sariiraha ee hore, ee la dhisay 1954kii. Dadka cibaadaysanayaa waxay halkan usoo guureen 1996kii, waxaanay hindisayaan inay halkan ka dhisaan kiiniisad cusub.

## Aragtida Farshaxanyaqaanka

Shaqadu waxay muujinaysaa sida halkan lagu cibaadaystaa ay u badashay warshadii hore ee loogu rogay bar kulan ay bulshadu ku kulanto. Waxaa la dhexmariyay qalabka agabta ah (furniture) hoostiisa waayir(cable) ah AV oo ah xidhiidhiya shaashado fiidiyow ah oo xidhiidhinaya qaybaha kala duwan ee dhismhaha oo  baahinaya sida wacdiga loo gaadhsiinayo dhegeysataasha wax caabudaya. Jestka Caqiidada (faith chest) waxaa is dhinac yaala fiidiyo ah adeega iyo khariidada hoolka wayn, lamaanaha labadaasi  waxay si cad u muujinayaan qaayaha meesha.

RELIGION & PLACE

## Brick Lane Jamme Masjid

59 Brick Lane, London, E1 6PU

| | |
|---|---|
| Masuulka Dhismaha: | Sajad Miah iyo Ansar Ullah |
| Dugsiga: | Dugsiga Hablaha ee Bishop Challoncers Catholic. |
| Farshaxanyaqaanka: | Viyiki Turnbull |

## Tixraaca Taariikheedka

Dhismahan waxaa la dhisay 1743kii, isagoo u ah meel dhamaystir ah chapelka ee Huguenotka Faransiiska Kiniisada (Protestant)ka ah ee Magaalada London, si ay u haqab tirto qoxootiga faraha badan ee imanay halkaa. Badhtamihii 1819kii waxay noqotay chapel ah Methodist (xubin ka tirsan kiniisada) kabib laga bilaabo 1897kii ilaa 1976kii waxay ahayd Spitalfields' Great Synagogue. Waxaa loo rogay Brick Lane Jamme Masjid 1976kii. Waxa la siiyay darajada II.

## Aragtida Farshaxanyaqaanka

Nuqulka iyo balaadhinta masaaxada Jestka Caqiidadu (Chest Faith), musawirka xeesha-dheer wuxuu kaa talaabinayaa xudduda sanduuqan. Walaxii kala duwana waxaa lagu muujiyay si musawir gacmeed is raacraacsan ah(animated). Iyadoo la sawiranayo xidhiidhkii cidii kale ee soo isticmaashay meesha annaga ka hor.

## St George-in-the East

Cannon Street Rd, London E1 OBH

| | |
|---|---|
| Masuulka Dhismaha: | Rev. Michael Ainsworth |
| Dugsi: | Dugsiga St Paul's Way Community |
| Farshaxanyaqaan: | Narrt Evabs |

## Tixraac Taariikheed

Dhagaxa wayn ee kiniisadan waxaa la dhisay 1714 – 1729kii, waxaa hindisay Nicholas Hawksmoor, waxaa wixii hoosyaalay laga qaaday Dagaalkii Labaad ee Aduunka, laakiin muuqaalkeeda sare wuu ishaystay; Sanadkii 1960kii ayaa kiiniisad ka yar lag dhisay gidaaradii hore hoostooda. Waxaa la siiyay darajada I.

## Aragtida Farshaxanyaqaanka

Ayadoo la adeegsanayo calaamadihii iyo muuqaaladii ay ardadu sawireen booqashadoodii kiniisada, shaqada waxaa laga sameeyay hummaag laba dabaq ah. Humaagyadu waxay ahaayeen qidcado la googooyay oo ah qaar shafaaf ah raandhiis leh oo u ogolaanaya in midabka iyo ilaysku uu dhaafayo. Wuxuu utaaganyahay sidii sifeeye lagu muujinayo muuqaal sawir ah sifaynaya/nadiifinaya muhimada dhismahan.

RELIGION & PLACE

# Poplar Baptist Church

2 Zetland St., London E24 6RB.

Maamulaha Dhismaha: Dixon

Dugsiga: Dugsiga St Paul’s Way Community

## Farshaxan Yaqaan:

Tixraaca Taariikheed

Kiniisadii ugu horaysay waxaa la dhisay 1882 -3kii. Kadib makii uu burbur gaadhay Dagaalkii La-baad ee Aduunka, Kiinsad yar oo cusub ayaa la furay 1951kii, markii labadii qolo ee cibaadaysan-ayay la isku daray ee ka la ahaa Poplar iyo Berger Baptist Taberncle. Kadib waxaa la sameeyay lacag ururin si lacagta ka soo baxda loogu dhiso dhisme ka balaadhan oo ku yaala dhinacooda, dugsiga Axada iyo adeegyada kala duwan ee ay kiniisadu bixiso.

## Aragtida Farshaxanyaqaanka

Kaleidoscope (waa walax sidii dhululbo u samaysay oo leh midabo iyo muqaalo kala duwan, waa aalad leh aragti kakan) waxa uu ka koobanyahay muqaalo ay ardadu ay ka sawireen si khaas ah markii ay soo siyaarteen kiniisada. Xaqiiqo ahaan kiniisada waxaa ka maqnaa wixii qurxinayay laakiin ardadu waxay arkeen muuqaalo iyo qormooyin ah mid la hindisay oo aa yaala meelo aan laga filayn- saqafka, daaqadaha iyo kuraasida. Marka aad rogto Kaleidoscopeka waxaad helaysaa muuqaalo u eg kuwii daaqadaha.